# Liiska-hubinta Maqalka iyo Hadalka

## (Si loo caawiyo la-socodka maqalka ilmahaaga)

### Dhalashada ilaa 3 bilood

- [ ] La qabsiga dhawaaq la garanayo ama codad
- [ ] Waa naxaa isaga oo ka boodaya dhawaaqa degdegta ah

### 3 ilaa 6 bilood

- [ ] Wuxuu u leexiyaa madaxa iyo indhaha dhinaca dhawaaq xiisaha leh
- [ ] Wuxuu u muuqdaa inuu wax dhegaysanayo
- [ ] Wuxuu ugu kacaa dhawaaqa si sahlan
- [ ] Wuxuu bilaabaa inuu sameeyo dhawaaq hadal u eg

### 6 ilaa 12 bilood

- [ ] wuxuu fahmaa erayo sahlan sida 'maya' iyo 'nabadeey'
- [ ] wuxuu bilaabaa inuu koobi gareeyo dhawaaqyo
- [ ] wuxuu u leexiyaa madaxa dhawaaq khafiif ah

### 12 ilaa 18 bilood

- [ ] Wuxuu u muuqdaa inuu fahmayo erayo badan isbuuc kasta walba
- [ ] Marka la weydiiyo, wuxuu tilmaamaa dadka, Qeybaha Jirka ama tooyo
- [ ] Wuxuu raacaa awaamiirta sahlan sida 'fariiso'
- [ ] Wuxuu yiraahdaa laba ilaa saddex eray oo run ah sida 'kubbad, 'ey', 'gaari'

## Ilmahayga ballantiisa dhakhtarka dhegaha

Dhakhtarka maqalka ayaa doonaya inuu baaro ilmahaaga maqalkiisa waqti ka hor da'da 12 bilood. Way kula soo xirirayaan si waqti laguugu sameeyo.

### Ballanta Dhakhtarka Maqalka

Adeega Maqalka: ..............................................................................

Cinwaanka: ..............................................................................

Telefoon lambarka: ..............................................................................

Qofka lala xiriirayo: ..............................................................................

**Taariikhda iyo Waqtiga:** ..............................................................................

## Maxaa dhacaya haddii aanan ballanta samayn?

Haddii aadan iman karin ballanta, u sheeg dhakhtarkaaga maqalka si uu uqabanqaabiyo ballan kale.

## Maxaa dhaca haddii aan guuro?

Haddii aad u guurto magaalo ama degma kale, wac dhakhtarkaaga maqalka ee kore waxayna ku siinayaan talada Adeeg Dhakhtar Maqal oo kale oo kugu dhow.

Haddii faahfaahintaada ama cinwaanku isbedelo fadlan u ogolow adeega maqalka inay ogaadaan, si ay kuula socodsiiyaan ballamaha.

Haddii aadan maqal dhakhtarka dhegaha waqtiga ilmahaagu gaaro hal sano, la xiriir dhakhtarkaaga maqalka si loo qabanqaabiyo ballanta.

Maqalku waa la tijaabin karaa da' walba. Haddii aadan haysan xawilaada dakhtarka maqalka aadna ka welwelsan tahay ilmahaaga maqalkiisa, weydii ilmahaaga dhakhtarkiisa ama shaqaalaha rugta caafimaadka wixii xawilaad ah si uu ugu sameeyo baaritaan dhakhtarka maqalku.

# Healthy Hearing Program

**Barnaamijka Maqalka ee Caafimaadka qaba**




# Your Baby's Follow-Up Hearing Test

## Ilmahaaga La-socodkiisa Tijaabada Maqalka

Ilmaha maqalkiisu wuxuu isku bedeli karaa waqti dhow.

Qoraalkaani wuxuu sharxaya sababta muhiimka ugu tahay ilmaha qaarkood inay hellaan in maqalkooda mar labaad la tijaabiyo **dhalashadooda 1aad**, ama horraantii **6 asbuuc markay** jiraan waxyaalla khatara oo ogaaday.

Queensland Government

# Dhegaysiga Caafimaadka qabaa muhiim ayuu u yahay ilmahaaga hadalkiisa iyo horumarka luqada bilaha noloshiisa ugu horraysa

## Ilmahaygu waa ka gudbey baaristii maqalka, maxay ugu baahan yihiin dhegaysi kale oo maqalka ah?

Ilmahaagu wuxuu leeyahay mid ka badan tilmaamayaasha khatarta laga yaabo inay siyaadiyaan fursadooda yeelashada lumida maqalka markay sii waynaadaanba.

Haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah waxyaallaha khatarta siyaadiya dib ayaa loo eegayaa maqalka:

- waxyaallaha la xiriira lumitaanka maqalka
- dhibaatooyinka qaabka wajiga/madaxa sida sanqoole

Haddii mid ama ka badan oo khataraha soo socdaa ay jiraan ilmahaaga dib  ayaa loo eegayaa maalintay hal sano jiraan:

- qoyska oo horay u lahaa dhega la'aan joogto ah: taas macneheedu waxa weeye waalidiinta ama walaalaha qaba dhega la'aan ilaa ilmanimadoodii
- iyaga oo wajahaya infakshan inta uurka lagu jiro ama dhalida
- ilmaha laga caawimayey hawada in ka badan 5 maalmood dhalida ka dib
- dhibaatooyin qalafsan xagga neefsiga xilliga dhalida
- indhacaseeye aad u daran

In kastoo tira aad u yar oo carruur yaryar ah ay ku dhacdo khatartaani  waxay keentaa dhega la'aan, weli waa muhiim inaad hesho dhakhtarka maqalka inuu baaro ilmahaaga maqalkiisa markay xoogaa weynaadaan.

## Waa maxay dhakhtarka Maqalku?

Dhakhtarka maqalku waa qof ku takhasusay maqalka oo leh xirfada iyo qalabka lagu fuliyo baaritaan maqal oo faahfaahsan.

## Ilmahaygu wuxuu u muuqdaa inuu ka jawaabayo codka. Weli ma u baahan yihiin in maqalkooda la baaro?

Carruurta badankeed leh maqal la'aanta weli way maqli karaan dhawaaqyada qaarkood. Sidaas darteed, aqoonsiga dhega la'aanta suurtagal maaha haddii aan lagu samayn baaritaan rasmiya.

**Haddii aad welwel ka qabto ilmahaaga maqalkiisa, waxaad wici kartaa dhakhtarka maqalka si aad ballan u samaysato.**

## Maxaa dhaca inta la samaynayo baaritaanka maqalka?

Dhakhtarka maqalku wuxuu samayn doonaa dhowr baaritaan oo maqalka ah si loo hubiyo dhowr qaybood oo qaabilsan habka maqalka ilmaha. Waxay waqtiga ballanta sharxi doonaan baaritaan walba iyo natiijooyinka.

Baaritaanadaasi waxay ta'kiidin doonaan haddii ilmahaaga maqalkiisu yahay caadi ama haddii maqalku ka lumay.



**Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu u baahan yahay laba ballamood si loo hello natiijooyin.**

## Immisa ayuu iigu kacayaa baaritaanka maqalku?

Adeegyada maqalka oo la siiyo dadweynaha waa lacag la'aan waxaana helli kara carruurta haysata medicare-ka, ama ha ku dhasheen isbitaalka barayfitka ah ama kan dadweynaha. Haddii aad doorato inaad aado dhakhtarka barayfitka ah ee maqalka waa inaad kala hadashaa qiimaha ballanta ka hor.

Qofka ku baaraya ayaa ku siin doona faahfaahinta adeega Maqalka agtaada ah.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu qabo dhega la'aan?

Haddii ilmahaagu qabo maqal la'aan mudo gaaban ah, dhakhtarkaaga ayaa ku talin doona inuu arko mar labaad. Haddii maqal la'aanta mudada gaaban ah ay soo fiicnaan weydo, dhakhtarka maqalka wuxuu ku talin doonaa in ilmahaagu arko qofka ku takhasusay dhegaha, sanka iyo cunaha (ENT).

Haddii ilmahaagu uu qabo maqal la'aan joogto ah, dhakhtarkaaga maqalka ayaa kuu xawili doona kuwaan qaar ka mid ah ama dhamaantood.

- Rugta caafimaadka ee maqalka ilmaha yar
- Qofka ku takhasusay Cunaha, Sanka iyo Dhegaha
- Dhakhtarka Carruurta dhalatay
- Australian Hearing, in lagu rakibo ilmaha gargaarayaasha maqalka
- Adeega Kaalmada Qoyska Queensland ee Ilmaha Lumiyey Maqalka (QHLFSS)
- Adeegyo kale oo ah adeegyada takhasuska

QHLFSS waxay caawimi doontaa inay kugu xiraan adeegyadaan.

In waqti hore la ogaado maqal la'aanta waxay siisaa fursada ugu fiican ilmahaaga hadalkiisa iyo horumarka luqada. Aad ayay muhiim ugu tahay barashada mustaqbilka, samaqabka dareenka iyo bulshada.



Reviewed 2018